

Aspen Academy

**Ogeysiiska Sanadlaha ee Waalidka
Xuquuqda Codsashada Aqoonsiga iyo Xirfadaha Macallinka**

Dugsiga: Aspen Academy Taariikhda: 06/24/2026
(bisha/maalinta/sanadka)

Dugsigeenu wuxuu helaa maalgelin federaal oo loogu talagalay barnaamijyada aan qaybta ka ahayn *Xeerka Waxbarashada Dugsiyada Hoose Iyo Sare (Elementary and Secondary Education Act (ESEA))*, ee sanadkii (2015) wax laga baddalay. Sanad dugsiyeedka oo dhan, waxaan sii wadaynaa inaan ku siinno macluumaad muhiim ah oo ku saabsan sharcigan iyo waxbarashada cunugaaga. Sida ku cad sharciga waxbarasho ee hadda jira, waa waajib in macallimiintu ay haystaan rukhsadda iyo caddaynta Gobolka ee wax-baridda. Shatiga iyo caddaynta Gobolka ee wax-baridda waa tababarka loo baahan yahay inuu qaato qofka raba inuu macallin noqdo.

Waxaan aad ugu faaneynaa macallimiinteenna waxaana dareemeynaa inay diyaar u yihiin baridda sanad dugsiyeedka soo socda. Waxaan diyaar u nahay inaan siinno cunugaaga aqoon tayadeedu sarreyso. Waxaad xaq u leedahay inaad codsato macluumaadka ku saabsan xirfad aqooneedka macallinka cunugaaga ama kalkaalayaha macallinka cunugaaga. Kalkaalayaha macallinka wuxuu ardayda siiyaa tacliin dugsiyeed ama caawimaad kale iyadoo uu kormeerayo macallinka. Haddii aad codsato macluumaadkan, degmada ama dugsigu wuxuu sida ugu dhaqsaha badan kuugu siinayaan arrimaha soo socda:

- a. In macallinka uu la kulmay shuruudaha Gobolka ee shahaado qaadashada iyo rukhsadda looga baahan yahay heerarka fasalka iyo maaddooyinka uu barayo;
- b. In shuruudaha shahaado qaadashada iyo rukhsadda laga daayay macallinka (maxaa yeelay hadda looma baahna) sababo la xiriira xaalad deg deg ah ama mid ku-meel-gaar ah;
- c. In macallinku barayo maaddo uu shahaado iyo rukhsad ka haysto;
- d. In macallinku la kulmay shuruudaha Gobolku ansixiyey ama Gobolku aqoonsan yahay ee la xiriira shahaadooyinka, rukhsad, diiwaangelinta ama waxyaabo kale oo u dhigma. Shuruudahan waxay khuseeyaan anshax xirfadeedka uu macallinku ku shaqeynayo waxaana ka mid noqon kara baridda Luqadda Ingiriiska oo la baro Bartayaasha Ingiriisida, waxbarashada gaarka ah ama adeegyada la xiriira ee la siiyo ardayda aan lixaadkoodu u dhammaystirnayn, ama labadaba; iyo
- e. Haddii uu cunugaagu adeegyo Waxbarasho gaar ah ama Barnaamijka Title I ka baranayo kalkaaliye macallin, waxaad codsan kartaa inaad aragto aqoonsiga waxbarasho ee kalkaalayaha macallinka.

Waxaa shaqaalaheenna ka go'an inay ka caawiyaan cunugaaga inuu horumar ka sameeyo dhanka bulshada, tacliinta iyo si wanaagsan u fakaridda uu u baahan yahay si uu ugu guulaysto dugsiga iyo wixii ka dambeeya. Ballanqaadkaas waxaa ka mid ah xaqiijinta in dhammaan macallimiinteenna iyo kalkaaliyeyaasha macallimiinteenna ay yihiin dad ay xirfaddoodu sarreyso.

Haddii aad rabto inaad codsato macluumaad ku saabsan macallimiinta ama kalkaaliyeyaasha macallimiinta ee cunugaaga, ama haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan sababta cunugaaga loogu dooray macallin ama kaaliye macallin, fadlan kala xiriir dugsiga cunugaagu dhigto qofka soo socda:

Magaca: Eric Sandberg Jagada: Principal
Imaylka: Eric.Sandberg@aspenacademymn.org Telefoonka: 952-226-8198

Waad ku mahadsan tahay daneynta iyo ka qeybqaadashada waxbarashada cunugaaga.

Salaan iyo aayatiin suubban,

Eric Sandberg Principal
Magaca Jagada

Dugsiga degmadu ma sameeyo takoor la xiriira jinsiga, midabka, isirka, da'da, naafanimada marka ay timaaddo arrimaha la xiriira shaqaaleynta ama bixinta barnaamijyada iyo adeegyada. Wuxuu si siman fursadaha u siiyaa ka mid noqoshada naadiga dhallinyarada ku dhiirigeliya qabashada hawlaha ka baxsan dugsiga iyo kooxaha kale ee dhallinyarada. Shakhsiga soo socda ayaa u xil saaran inuu la tacaalo su'aalaha iyo cabashooyinka khuseeya siyaasadaha aan wax takoorin iyo isu duwidda dadaallada dhaqangelinta siyaasaddan.

Magaca: Eric Sandberg Jagada: Principal
Cinwaanka: 14825 Zinran Avenue Savage, MN 55378
Telefoonka: 952-226-8198 Imaylka: Eric.Sandberg@aspenacademymn.org

Weydiimaha ama cabashooyinka waxaa lagu hagaajin karaa Office for Civil Rights, U.S. Department of Education, 400 Maryland Avenue S.W., Washington D.C. 20202, ama waxaad wici kartaa (800) 421-3481 or (877) 521-2172 (TTY).

OFFICE USE ONLY			
Student ID #:	Date Distributed:		